# GOLAHA WAKIILADA JSL

## WAAXDA HADAL-QORAALKA IYO GUDIYADA

**Kal-fadhigii 37aad fadhigii 11aad**

**28/07/2018**

**Quraanka: -** Md Maxamuud Axmed Obsiiyey

**Gudoonka: -** Gudoomiye Md. Baashe Maxamed Faarax

**Ajandaha Fadhiga:-**

- Ansixinya xeerka ka soo noqday Golaha Guurtida ee Xeerka Maaraynta Deegaanka

**Gudoomiyaha: -** Mudanayaal waxaynu u balan sanayn ansixinta Xeerka Maaraynta Deegaanka, Waxa fadhiya 42 xuldhibaan markaa qodobka ugu horeeya ee ay wax ka bedelka Golaha Guurtidu ku samaysay xeerka xoghayntu ha akhrido:- xoghaynta ha akhrido qodobada.

### Qodobka 2aad:
### Qeexida Erayada

**Wuxuu u dhignaa sidan:-**

18. "Wakaaladda ay Khusayso/Hogaanka u ah (Lead Agency)" waxa loola jeedaa Wasaarad, Waax, Shirkad dawladeed iyo xafiis dawladeed oo uu xeerkani awood u siiyay in ay maareeyaan deegaanka ama khayraadka dabiiciga ah.

43. Maxkamadda Deegaanka (Tribunal)" waxa loola jeedaa Maxkamadda Qaranka ee Deegaanka sida ku xusan qodobka….

**Waxaa loo Bedelay Sidan;-**

### Qodobka 2aad
### Qeexidda Ereyada

18. "**Hay`adaha Dawladda ee ay Khusayso"** waxa loola jeedaa Wasaarad, Wakaalad, Shirkad dawladeed, iyo xafiis dawladeed oo uu xeerkani awood u siiyay in ay maareeyaan deegaanka ama khayraadka dabiiciga ah.

43. "**Maxkamadda Awooda u leh:-** waxa loola jeedaa Maxkamadda Awooda u leh Xukunada xeerkanai jidaynayo taas oo ah Maxkamaddaha ku xusan Dastuurka Qaranka JSL, Degmo, Gobol, Rafcaan & Maxkamadda Sare.

**Goddoomiyaha:** Xildhibaanada ogol sidii Golaha Wakiiladu ku ansixiyeen Gacanta ha taagaan:-

Xildhibaanada fadhiya: 42

Xildhibaanada ogol sidii Golaha Wakiiladu u ansixiyey: 1

Xildhibaanada Ogol sidii Golaha Guurtidu u dhigeen: 36

Xidhibaanada Aaamusay: 4

Guddoomiyuhu: Ma Codayn

**Guddoomiyaha:** Qodobadda 2$^{aad}$ farqadaha 18$^{aad}$ iyo 43$^{aad}$ waxa loo raacayaa wax ka beddelkii ay sameeyeen Golaha Guurtidu.

## Qodobka 4$^{aad}$:
## Wasaaradda

**Farqada 3$^{aad}$ waxay u dhignayd sidan:-**

3. Wasaaraddu waxa ay soo saari kartaa mabaadii guud oo ay ku dhaqmaan wasaaradaha kale, waaxyaha dawladda, guddiga qaranka ee talo bixinta deegaanka, guddiga maaraynta deegaanka ee degmooyinka, wakaaladaha iyo Wasaaradaha dawladda ama kuwa gaarka ah ee ka qayb qaadan kara dhaqan galinta xeerkan.

**Faqraddiisa 3$^{aad}$ Waxaa loo Bedelay Sidan:-**

3. Wasaaraddu waxa ay soo saari kartaa **Xeer-nidaamiye** ay ku dhaqmaan wasaaradaha kale, waaxyaha dawladda, guddiga qaranka ee talo bixinta deegaanka, guddiga maaraynta deegaanka ee degmooyinka, **Hay`adaha dawladda** ama kuwa gaarka ah ee ka qayb qaadan kara dhaqan galinta xeerkan.

**Goddoomiyaha:** Xildhibaanada ogol sidii Golaha Wakiiladu ansixiyeen Gacanta ha taagaan:-

Xildhibaanada fadhiya: 42
Xildhibaanada ogol sidii Golaha Wakiiladu u ansixiyey: 1
Xildhibaanada Ogol sidii Golaha Guurtidu u dhigeen: 37

Xidhibaanada Aaamusay: 4

Guddoomiyuhu: Ma Codayn

**Guddoomiyaha:** Qodobadda 4$^{aad}$ waxa loo raacayaa wax ka beddelkii ay sameeyeen Golaha Guurtidu.

## Qodobka $6^{aad}$:
## Guddiga Talo bixinta Horumarinta Joogtaysan
## (Sustainable Development Advisory Committee)

**Qodobka $6^{aad}$ wuxuu u dhignaa sidan:**

1. Soo jeedinta tilmaamo iyo isuduwidda siyaasadaha deegaanka ee Wasaaradda.
2. Isku xidhka Wasaaradda iyo golaha wasiiradda
3. Soo jeedinta caqabadaha ka hor iman kara dhaqan galinta siyaasadaha iyo mashaariicda deegaanka, iyo hubinta siyaasadahaas iyo mashaariicdaas.
4. Waxa ay wasiirka kala talinayaa arimahan:

   **B**. Siyaasadda iyo Istaraatajiyada lagu maaraynayo ilaalinta iyo isticmaalka deegaanka.

   **T**. Ilaalinta noolaha, isticmaalka khayraadka dalka si ayna waxyeello u gaadhin deegaanka wakhtiga fog taasoo sababaysa hoos u dhac ku yimaada deegaanka si loo joogteeyo ka faa'idaysiga deegaanka ee jiilka maanta iyo kuwa mustaqbalka.

   **J**. Kormeerida ku haboon sidii loo hubin lahaa ku dhaqanka mabaadiida.

   **X**. Baahida wax ka bedelka iyo kaabidda xeerka ee araimaha ku saabsan deegaanka.

   **KH.** Fulinta hawlaha kale wasaaraddu u xilsaarto.

**Qodobkan $6^{aad}$ Faqradihiisa 1aad, 2aad & 4aad waxa loo Beddelay Sidan.**

1 Soo jeedinta tilmaamo iyo isuduwidda siyaasadaha deegaanka ee **Heer Qaran.**

**2.** Isku xidhka Wasaaradda iyo **Daneeyayaasha Deegaanka.**

3. Soo jeedinta caqabadaha ka hor iman kara dhaqan galinta siyaasadaha iyo mashaariicda deegaanka, iyo hubinta siyaasadahaas iyo mashaariicdaas.

4 Waxay Wasiirka Talo ugu soo Gudbinayaan Arrimahan:

   **B**. Siyaasadda iyo Istaraatajiyada lagu maaraynayo ilaalinta iyo isticmaalka deegaanka.

   **T**. Ilaalinta noolaha, isticmaalka khayraadka dalka si ayna waxyeello u gaadhin deegaanka wakhtiga fog taasoo sababaysa hoos u dhac ku yimaada deegaanka si loo joogteeyo ka faa'idaysiga deegaanka ee jiilka maanta iyo kuwa mustaqbalka.

   **J**. Kormeerida ku haboon sidii loo hubin lahaa ku dhaqanka mabaadiida.

   **X**. **Soo jeedinta** Baahida wax ka **bedel** iyo **kaabiseed** ee xeerkan, arrimaha ku saabsan deegaanka.

   **KH.** Fulinta hawlaha kale wasaaraddu u xilsaarto.

**Goddoomiyaha:** Xildhibaanada ogol sidii Golaha Wakiiladu u ansixiyeen Gacanta ha taagaan:-

Xildhibaanada fadhiya: 42

Xildhibaanada ogol sidii Golaha Wakiiladu u ansixiyey: 1

Xildhibaanada Ogol sidii Golaha Guurtidu u dhigeen: 35

Xidhibaanada Aaamusay: 5

Guddoomiyuhu: Ma Codayn

**Guddoomiyaha:** Qodobadda 6$^{aad}$ waxa loo raacayaa sidii Golaha Wakiiladu u ansixiyeen.

## Qodobka7$^{aad}$:
## Qaab dhismeedka Guddiga Talo bixinta Horumarka Joogtaysan

**Qodobka 7$^{aad}$ Waxa uu dhignaa sidan:-**

1. Guddiga talo bixinta horumarka joogtaysan waxa uu ka koobanyahay:
   - B. Afar xubnood oo matalaya danaha dawladda.
   - J. Shan xubnood wasiirku soo magacaabay oo matalaya danaha ururradda rayidka ah, ururrada iyo Wasaaradda daneeya arimaha deegaanka.

2. Xubnaha la soo magacaabay waa in ay leeyihiin aqoonta iyo waayo aragnimada loo baahanyahay ee deegaanka.

**Qodobka 7$^{aad}$ Waxa loo Bedelay Sidan:-**

1. Guddiga talo bixinta horumarka joogtaysan waxa uu ka koobanyahay **12xubnood oo ka** kala imanaya hay`adahan Dawlada, waxaana guddoomiye u ah Wasiirka Degaanka:
   - b. Wasaaradda Degaanka.
   - t. Wasaarada Beeraha.
   - j. Wasaarada Caagfiaadka
   - x. Wasaaradda Xanaanada Xoolaha & kaluumaysiga.

   Kh. Wasaarada Arrimaha Gudaha.

   - d. Wasaaradda Biyaha Qaranka.
   - r. Wasaaradda Macdanta & Tamarta.
   - s. Wasaaradda Warshadaha.

   Sh. Hay`adda Dhowrista Tayada.

   dh. Laba Xubnood oo ka imanaya Gudiyada Arrimaha Deegaanka ee Labada Gole Baarlamaan.

2. Gudidan Talo bixinta Horumarka Joogtaysan waxaa xoghaye u noqonaya Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Deegaanka oo ka mid ah Gudida, waxaanay Gudidu kulmayaan sadexdii biloodba hal mar iyo fadhiyo aan caadi ahayn hadii loo baahdo.

**Goddoomiyaha:** Xildhibaanada ogol sidii Golaha Wakiiladu ku ansixiyeen Gacanta ha taagaan:-

Xildhibaanada fadhiya: 42

Xildhibaanada ogol sidii Golaha Wakiiladu u ansixiyey: 6
Xildhibaanada Ogol sidii Golaha Guurtidu u dhigeen: 27

Xidhibaanada Aaamusay: 8

Guddoomiyuhu: Ma Codayn

**Guddoomiyaha:** Qodobadda 7aad waxa loo raacayaa wax ka beddelkii ay sameeyeen Golaha Goortida.

## Qodobka 12aad
## Codsiga Qiimaynta Saamaynta Deegaanka

**Qodobka 12aad Farqada 6aad waxay u dhignayd sidan:-**

6) Agaasimaha guud waa in uu codsiga go'aan kaga gaadhaa mudo saddex bilood gudahood ah.

**Qodobka 12aad Faqraddiisa 6aad Waxaa loo Bedelay Sidan.**

6) Agaasimaha guud waa in uu codsiga go'aan kaga gaadhaa mudo **sodon cisho ( 30 cisho)** gudahood ah.

**Goddoomiyaha:** Xildhibaanada ogol sidii Golaha Wakiiladu ku ansixiyeen Gacanta ha taagaan:-

Xildhibaanada fadhiya: 44
Xildhibaanada ogol sidii Golaha Wakiiladu u ansixiyey: 1
Xildhibaanada Ogol sidii Golaha Guurtidu u dhigeen: 30

Xidhibaanada Aaamusay: 12

Guddoomiyuhu: Ma Codayn

**Guddoomiyaha:** Qodobadda 12aad farqada 6aad waxa loo raacayaa wax ka beddelkii ay sameeyeen Golaha Guurtidu.

## Qodobka 13aad
## Soo bandhigida Qiimaynta Saamaynta Deegaanka

**Qodobka 13aad Farqada 1aad Xarafka X waxa uu u dhignaa sidan:-**

**X.** Wakhti cayiman oo aan ka badnayn lixdan maalmood oo talooyin/faallo lagaga bixin karo(comments) daraasadda.

**Qodobka 13aad faqraddiisa 1aad xaraf X Waxaa loo Bedalay Sidan:-**

**X.** Wakhti cayiman oo aan ka badnayn Kow & Labaatan Maalmood **(21 maalmood )**oo talooyin/faallo lagaga bixin karo(comments) daraasadda.

**Goddoomiyaha:** Xildhibaanada ogol sidii Golaha Wakiiladu ku ansixiyeen Gacanta ha taagaan:-

Xildhibaanada fadhiya: 44
Xildhibaanada ogol sidii Golaha Wakiiladu u ansixiyey: 36
Xildhibaanada Ogol sidii Golaha Guurtidu u dhigeen: 1

Xidhibaanada Aaamusay: 7

Guddoomiyuhu: Ma Codayn

**Guddoomiyaha:** Qodobadda 13^aad faqraddiisa 1^aad xaraf X waxa loo raacayaa sidii Golaha Wakiiladu u ansixiyeen.

**Qodobka 20aad**
**Guddiga Dhaqangalinta iyo Dib u Eegista Heerarka**
**(Standards and Enforcement Review Committee)**

**Qodobka 20^aad Faqradaha 2^aad, 3^aad , iyo 7^aad Waxay u dhignaayeen Sidan:-**

2 Guddigu waxa uu ka koobanyahay xubnaha ku qoran jadwalka saddexaad ee xeerkan.
3 Xoghayaha guud ee wasaaradda ayaa ah gudoomiyaha guddiga.
7. Guddigu waa in uu kulmaa/shiraa ugu yaraan saddexdii bilood hal mar.

**Qodobka 20^aad Faqradaha 2^aad, 3^aad , iyo 7^aad Waxa loo beddelay Sidan:-**

**2** Guddigu waxa uu ka kooban yahay **Agaasimayaasha Wasaaradaha** ku qoran **Qodobka 7aad ee xeerkan marka laga reebo xubnaha labada Gole Qaran .**
3 **Agaasimaha Guud** ee wasaaradda ayaa ah gudoomiyaha guddiga.
**7.** Guddidu waa inay kulmaan/shiraan ugu yaraan **bishiiba hal mar iyo fadhiyo aan caadi ahayn hadii loo baahdo.**

**Goddoomiyaha:** Xildhibaanada ogol sidii Golaha Wakiiladu ku ansixiyeen Gacanta ha taagaan:-

Xildhibaanada fadhiya: 45
Xildhibaanada ogol sidii Golaha Wakiiladu u ansixiyey: 8
Xildhibaanada Ogol sidii Golaha Guurtidu u dhigeen: 18
Xidhibaanada Aaamusay: 18
Guddoomiyuhu: ma codayn

**Guddoomiyaha:** Qodobadda 20aad Faqradaha 2aad, 3aad , iyo 7aad waxa loo raacayaa wax ka beddelka ay sameeyeen Golaha Guurtidu.

## Qodobka 22aad
## Wasakhaynta Biyaha

**Qodobka 22aad Faqradaha 1aad Waxay u dhignayd Sidan:-**

1. Xeerkani marka uu dhaqangalo ka dib, qof kasta oo ku xadgudba heerarka wasakhaynta biyaha ee xeerkani qeexay kuna shuba ama ku siidaaya deegaan biyoodka wasakh nooc kasta sida sunta, wasakhda shucaaca (radioactive waste), waxa lagu soo oogayaa fal dambiyeed oo waxaana lagu xukumi karaa xadhig aan ka badnayn laba sano ama ganaax lacageed oo dhan hal million oo SL SH ah.

**Qodobka 22aad Faqradaha 1aad Waxa loo beddelay Sidan:-**

**1.** Xeerkani marka uu dhaqangalo ka dib, qof kasta oo ku xadgudba heerarka wasakhaynta biyaha ee xeerkani qeexay kuna shuba ama ku siidaaya deegaan biyoodka wasakh nooc kasta sida sunta, wasakhda shucaaca (radioactive waste), waxa lagu soo oogayaa fal dambiyeed oo waxaana lagu **xukumayaa xadhig u dhexeeya hal sano illaa toban sano ( 1sano – 10sano ) iyo ganaax lacageed oo u dhexeeya hal milyan illaa toban milyan SL SH ah ( 1,000,000/=SLsh – 10,000,000/=SLsh.**

**Goddoomiyaha:** Xildhibaanada ogol sidii Golaha Wakiiladu ku ansixiyeen Gacanta ha taagaan:-

Xildhibaanada fadhiya: 45
Xildhibaanada ogol sidii Golaha Wakiiladu u ansixiyey: 29
Xildhibaanada Ogol sidii Golaha Guurtidu u dhigeen: 8

Xidhibaanada Aaamusay: 7

Guddoomiyuhu: Ma Codayn

**Guddoomiyaha:** Qodobadda 22aad faqraddiisa 1aad waxa loo raacayaa sidii Golaha Wakiiladdu u ansixiyeen.

## Qodobka 28aad
## Heerka Tayada Hawada

**Qodobka 28aad Faqradaha 2aad Waxay u dhignayd Sidan:-**

2. Qof kasta oo siidaaya walxo wasakhaynaya hawada, kuna xadgudba heerarka xeerkani dhigay waxa lagu qaadayaa dambi oo waxaa lagu xukumi xadhig aan ka badnayn laba sano ama ganaax aan ka badnayn shan boqol oo kun oo SL SH. Ama labadaba.

**Qodobka 28aad Faqradaha 2aad Waxa loo beddelay Sidan:-**

2. Qof kasta oo siidaaya walxo wasakhaynaya hawada, kuna xadgudba heerarka xeerkani dhigay waxa lagu qaadayaa dambi oo waxaa lagu **xukumayaa xadhig u dhexeeya hal sano illaa lix sano ( 1sano -6sano ) iyo ganaax lacageed oo u dhexeeya hal milyan illaa lix milyan SLsh ( 1,000,000/=SLsh – 6,000,000/=SLsh ).**

**Goddoomiyaha:** Xildhibaanada ogol sidii Golaha Wakiiladu ku ansixiyeen Gacanta ha taagaan:-

Xildhibaanada fadhiya: 45
Xildhibaanada ogol sidii Golaha Wakiiladu u ansixiyey: 27
Xildhibaanada Ogol sidii Golaha Guurtidu u dhigeen: 8

Xidhibaanada Aaamusay: 9

Guddoomiyuhu: Ma Codayn

**Guddoomiyaha:** Qodobadda 28aad faqraddiisa 2aad waxa loo raacayaa sidii Golaha Wakiiladdu u ansixiyeen.

## Qodobka 29aad
## Goobaha La Xakameeyay

**Qodobka 29aad Faqradaha 1aad iyo 2aad Waxay u dhignayd Sidan:-**

1. Wasiirku isagoo la tashanaya Wasaaradda waxa uu shaacin karaa goobo dhowrsoon/xidhan, isagoo ogeysiiska ku qoraya Gazette.

2. Wasiirku isagoo la tashanaya Wasaaradda waa in uu qeexo **xeerka** heerka hawada lagu siidayn karo gobaahas.

**Qodobka 29aad Faqradaha 1aad iyo 2aad waxa loo beddelay Sidan:-**

1. Wasiirku isagoo la tashanaya Wasaaradda waxa uu **shaacinayaa** goobo dhowrsoon/xidhan, isagoo ogeysiiska ku qoraya **faafinta rasmiga ah ( National** Gazette ).

2. Wasiirku isagoo la tashanaya Wasaaradda waa in uu qeexo heerka hawada lagu siidayn karo **gobahaas.**

**Goddoomiyaha:** Xildhibaanada ogol sidii Golaha Wakiiladu ku ansixiyeen Gacanta ha taagaan:-

Xildhibaanada fadhiya: 45
Xildhibaanada ogol sidii Golaha Wakiiladu u ansixiyey: 12
Xildhibaanada Ogol sidii Golaha Guurtidu u dhigeen: 24

Xidhibaanada Aaamusay: 8

Guddoomiyuhu: Ma Codayn

**Guddoomiyaha:** Qodobadda 29aad faqraddiisa 1aad iyo 2aad waxa loo raacayaa wax ka beddelkii ay sameeyeen Golaha Guurtidu.

## Qodobka 40aad
## Qashinka Halista ah

**Qodobka 40aad Faqradaha 5aad Waxay u dhignayd Sidan:-**

5) Qofka ku xadgudba qodobbada xeerka, been abuur ka sameeya ama kootarabaaniya qashinka halista ah waxa lagu soo oogayaa fal danbiyeed waxaa lagu xukumayaa xadhig….ama hal million SL SH.

**Qodobka 40aad Faqradaha 5aad waxa loo beddelay Sidan:-**

5) Qofka ku xadgudba qodobbada xeerka, been abuur ka sameeya ama kootarabaaniya qashinka halista ah waxa lagu soo oogayaa fal danbiyeed waxaana lagu **xukumayaa xadhig u dhexeeya hal sano illaa sadex sano iyo ganaax lacageed oo u dhexeeya hal million illaa sadex milyan SL SH.**

**Goddoomiyaha:** Xildhibaanada ogol sidii Golaha Wakiiladu ku ansixiyeen Gacanta ha taagaan:-

Xildhibaanada fadhiya: 45
Xildhibaanada ogol sidii Golaha Wakiiladu u ansixiyey: 1
Xildhibaanada Ogol sidii Golaha Guurtidu u dhigeen: 35

Xidhibaanada Aaamusay: 8

Guddoomiyuhu: Ma Codayn

**Guddoomiyaha:** Qodobadda 40aad faqraddiisa 5aad waxa loo raacayaa wax ka beddelkii ay sameeyeen Golaha Guurtidu.

## Qodobka 44aad
## Codsiga Diiwaangalinta Sunta Cayayaanka iyo Walxaha Sunta ah

**Qodobka 44aad Faqradaha 5aad Waxay u dhignayd Sidan:-**

5) Haddii aanay Wasaaraddu wakhti kale go'aamin, diwaangalinta daawooyinka cayayaanka iyo walxaha suntan ah waa mudo toban sano ah.

**Qodobka 44aad Faqradaha 5aad waxa loo beddelay Sidan:-**

5) Haddii aanay Wasaaraddu wakhti kale go'aamin, diwaangalinta daawooyinka cayayaanka iyo walxaha suntan ah waa mudo **shan sano ah.**

**Goddoomiyaha:** Xildhibaanada ogol sidii  Golaha Wakiiladu ku ansixiyeen  Gacanta ha taagaan:-

Xildhibaanada fadhiya: 45
Xildhibaanada ogol sidii Golaha Wakiiladu u ansixiyey: 1
Xildhibaanada Ogol sidii Golaha Guurtidu u dhigeen: 30

Xidhibaanada Aaamusay: 13

Guddoomiyuhu: Ma Codayn

**Guddoomiyaha:** Qodobadda 44aad faqraddiisa 5aad waxa loo raacayaa wax ka beddelkii ay sameeyeen Golaha Guurtidu.

**Qodobka 45aad**

**Xadgudubyada La Xidhiidha Daawooyinka cayayaanka iyo Walxaha Sunta ah**

**Qodobka 45aad Faqradaha 3aad  Waxay u dhignayd Sidan:-**

**2)** Qofka ku xadgudba qodobbadan waxaa lagu soo oogayaa fal dambiyeed waxaa lagu xukumayaa ganaax lacageed oo aan ka badnayn hal milyan oo SL.SH ama xadhig aan ka badnayn laba sano ama ganaax iyo xadhig la is raaciyay.

**Qodobka 45aad Faqradaha 3aad  waxa loo beddelay Sidan:-**

**2)** Qofka ku xadgudba qodobbadan waxaa lagu soo oogayaa fal dambiyeed waxaa lagu xukumayaa **xadhig u dhexeeya hal sano illaa toban sano ( 1sano – 10sano ) iyo ganaax lacageed oo u dhexeeya hal milyan illaa toban milyan ( 1,000,000/=SLsh – 10,000,000/=SLsh )**.

**Goddoomiyaha:** Xildhibaanada ogol sidii  Golaha Wakiiladu ku ansixiyeen  Gacanta ha taagaan:-

Xildhibaanada fadhiya: 45
Xildhibaanada ogol sidii Golaha Wakiiladu u ansixiyey: 27
Xildhibaanada Ogol sidii Golaha Guurtidu u dhigeen: 8

Xidhibaanada Aaamusay: 9

Guddoomiyuhu: Ma Codayn

**Guddoomiyaha:** Qodobadda 45aad faqraddiisa 3aad waxa loo raacayaa sidii Golaha Wakiiladdu u ansixiyeen.

## Qodobka 53aad
## Xadgudubyada La Xidhiidha Shucaaca

**Qodobka 53aad Faqradaha 1aad iyo 2aad Waxay u dhignayd Sidan:-**

(1) Qof kasta oo bilaa ruqsad soo dajiya, haysta, qoda, dhoofiya, qaada, isticmaala ama burburiya walxaha dhaliya shucaaca waxa lagu soo oogayaa fal danbiyeed, waxaana lagu xukumayaa xadhig aan ka yarayn laba sano ama ganaax lacageed oo aan ka yarayn shan boqol iyo konton kun oo SL.SH ah ama labada oo la is raaciyay.

**(2)** Xukunka faqradda 1aad ee xeerkan, waxa kale oo lagu xukumi **karaa** in walxaha lala wareego lana burburiyo si deegaanka iyo caafimaadka dadka loo ilaaliyo. **Haddii maxkamaddu amarto mulkiilaha waa loo celinayaa walxihii laga qaaday.**

**Qodobka 53aad Faqradaha 1aad iyo 2aad waxa loo beddelay Sidan:-**

**(1)** Qof kasta oo bilaa ruqsad soo dajiya, haysta, qoda, dhoofiya, qaada, isticmaala ama burburiya walxaha dhaliya shucaaca waxa lagu soo oogayaa fal danbiyeed, **waxaana lagu xukumayaa xadhig u dhexweeya hal sano illaa toban sano ( 1sano – 10sano ) iyo ganaax lacageed oo u dhexeeya hal milyan illaa toban milyan ( 1,000,000/=SLsh – 10,000,000/=SLsh ).**

(2) Xukunka faqradda 1aad ee xeerkan, waxa kale oo lagu **xukumayaa** in walxaha lala wareego lana burburiyo si deegaanka iyo caafimaadka dadka loo ilaaliyo.

**Goddoomiyaha:** Xildhibaanada ogol sidii Golaha Wakiiladu ku ansixiyeen Gacanta ha taagaan:-

Xildhibaanada fadhiya: 45
Xildhibaanada ogol sidii Golaha Wakiiladu u ansixiyey: 6
Xildhibaanada Ogol sidii Golaha Guurtidu u dhigeen: 31

Xidhibaanada Aaamusay: 7

Guddoomiyuhu: Ma Codayn

**Guddoomiyaha:** Qodobka 53aad Faqradaha 1aad iyo 2aad waxa loo raacayaa wax ka beddelkii ay sameeyeen Golaha Guurtidu.

### Qodobka 67aad
### Heshiisyada Caalamiga ah ee Deegaanka

**Qodobka 67aad Faqradaha 1aad Waxay u dhignayd Sidan:-**

(1) Haddii ay Somaliland qayb ka tahay heshiis laba dal ama dalal badan ka dhexeeya oo ku saabsan maaraynta deegaanka, Wasaaraddu iyadoo u hogaasamaysa tilmaamaha Golaha Wakiiladda la tashanaysa wakaaladaha ay khusayso waa in ay:
**B.**Bilawdo soo jeedinta mashruuc sharci oo ujeeddadu tahay sidii loo dhaqan galin lahaa heshiiska, Somaliland na ay u fulin lahayd waajibaadkeeda una heli lahayd xuquuqda uu heshiisku siinayo.
**T**. Qaado talaabooyinka kale ee loo baahanyahay si dalka looga dhaqan galiyo heshiiska.

**Qodobka 67aad Faqradaha 1aad waxa loo beddelay Sidan:-**

(1) Haddii ay Somaliland qayb ka tahay heshiis laba dal ama dalal badan ka dhexeeya oo ku saabsan maaraynta deegaanka, Wasaaraddu iyadoo u hogaasamaysa **xeerarka dalka u yaal, lana tashanaysa Hay`adaha Dawladda ee** ay khusayso waa in ay:
**B.**Bilawdo soo jeedinta mashruuc sharci oo ujeeddadu tahay sidii loo dhaqan galin lahaa heshiiska, Somaliland na ay u fulin lahayd waajibaadkeeda una heli lahayd xuquuqda uu heshiisku siinayo.
**T**. Qaado talaabooyinka kale ee loo baahanyahay si dalka looga dhaqan galiyo heshiiska.

**Goddoomiyaha:** Xildhibaanada ogol sidii Golaha Wakiiladu ku ansixiyeen Gacanta ha taagaan:-

Xildhibaanada fadhiya: 45
Xildhibaanada ogol sidii Golaha Wakiiladu u ansixiyey: 34
Xildhibaanada Ogol sidii Golaha Guurtidu u dhigeen: 0

Xidhibaanada Aaamusay: 10

Guddoomiyuhu: Ma Codayn

**Guddoomiyaha:** Qodobka 67aad Faqradaha 1aad waxa loo raacayaa sidii ay Golaha Wakiiladdu u ansixiyeen.

## Qodobka 68aad
## Abuuridda Maxkamadda Qaran ee Deegaanka

**Qodobka 68aad wuxuu u dhignayd Sidan:-**

(1) Waa in la sameeyo maxkamad qaran oo deegaan taas oo ka kooban xubnaha hoos ku qoran:
**B.** Gudoomiye ay soo magacaabeen Komishinka Adeegga Garsoorka. Gudoomiyuhu waa in uu yahay qof aqoon leh kaas oo la dhigma garsoore maxkamadda sare ee Somaliland.
**T**. Garyaqaan maxkamadda sare ka tirsan oo ay soo magacaabayaan Ururka sharciga ee Somaliland.

**J.**Garyaqaan aqoon u leh xeerka deegaanka oo uu soo magacaabayo Wasiirka.

**X**. Laba xubnood oo aqoon sare u leh arrimaha maaraynta deegaanka oo uu Wasiirku soo magacaabayo.

(2) Dhammaan xubnaha loo magacaabayo waa in magacyadooda Wasiirku ku soo saara Faafinta Rasmiga ah.

(3) Xubnaha waxaa la magacaabayaa wakhtiyo kale duwan si ay wakhtiyo kale duwan shaqadu uga dhammaato.

(4) Xafiiska xubin ka tirsan maxkamaddu waxa uu banaannaanayaa haddii:

**B**. Saddex sano kadib maalintii la magacaabay

**T**. Haddii uu aqbalo shaqo kale oo ka dhigaysa xubinnimadiisa maxkamadda wax u dhimaysa

**J.**Haddii uu hawshiisa ka soo bixi waayo sabab kasta ha noqotee is la markaana uu Wasiirku ka qaado xubinnimada.

**X**. Haddii uu xilka iska casilo.

**Qodobka 68[aad] waxa lagu koobay Farqad 1[aad] oo kaliya:-**

**(1) Maxkamadda awooda u leh xukunka Arrimaha degaanka ee xeerkani dhigayo waa kuwa uu distoorku xusayo sida Maxkamada Degmada Maxkamadda Gobolka Maxkamadda Rafcaanka iyo Maxkamada sare.**

**Goddoomiyaha:** Xildhibaanada ogol sidii Golaha Wakiiladu ku ansixiyeen Gacanta ha taagaan:-

Xildhibaanada fadhiya: 45

Xildhibaanada ogol sidii Golaha Wakiiladu u ansixiyey: 0

Xildhibaanada Ogol sidii Golaha Guurtidu u dhigeen: 39

Xidhibaanada Aaamusay: 5

Guddoomiyuhu: Ma Codayn

**Guddoomiyaha:** Qodobka 68[aad] waxa loo raacayaa wax ka beddelka ay sameeyeen Golaha Guurtida.

## Qodobka 81aad

## Xadgudubyahada la Xidhiidha Qiimaynta Saamaynta Deegaanka

**Qodobka 81[aad] Faqradaha 1[aad] waxaay u dhignayd Sidan:-**

1) Qof kasta oo:

**B.** Soo gudbin waaya warbixin mashruuc sida ku xusan qodobka 58 ee xeerkan

**T**. Diyaarin waaya warbixinta qiimaynta raad reebka deegaanka

**J**. Khayaano ku kaca warbixin been abuur ah soo gudbiya

**Qodobka 81aad Faqradaha 1aad xarafka (J) waxa loo beddelay Sidan:-**

1) Qof kasta oo:
   **B.** Soo gudbin waaya warbixin mashruuc sida ku xusan qodobka 58 ee xeerkan
   **T**. Diyaarin waaya warbixinta qiimaynta raad reebka deegaanka
   **J**. Khayaano ku kaca warbixin been abuur ah soo gudbiya, waxa uu galay xadgudub waxaana lagu xukumayaa xadhig u dhexeeya hal sano illaa lix sano ( 1sano – 6sano ) & ganaax lacageed oo u dhexeeya hal milyan illaa lix milyan ( 1,000,000/=SLsh – 6,000,000/=SLsh ).

**Goddoomiyaha:** Xildhibaanada ogol sidii Golaha Wakiiladu ku ansixiyeen Gacanta ha taagaan:-

Xildhibaanada fadhiya: 45
Xildhibaanada ogol sidii Golaha Wakiiladu u ansixiyey: 24
Xildhibaanada Ogol sidii Golaha Guurtidu u dhigeen: 9

Xidhibaanada Aaamusay: 12

Guddoomiyuhu: Ma Codayn

**Guddoomiyaha:** Qodobka 81aad waxa loo raacayaa sidii ay Golaha Wakiiladdu ku ansixiyeen.

## Qodobka 83aad
## Xadgudubyada La Xidhiidha Heerarka

**Qodobka 83aad Faqradaha 1aad waxaay u dhignayd Sidan:-**

1) Qof kasta oo:

   **B.**Ku xadgudba (jabiya) heerka deegaanka ee xeerkani dhigayo
   **T**. Ku xadgudba tallaabooyinka xeerkani dhigayo
   **J.** Burburiya, si aan waxtar lahaynna u isticmaala deegaanka iyo khayraadka dabiiciga ah.

**Qodobka 83aad Faqradaha 1aad xarafka (J) waxa loo beddelay Sidan:-**

1) Qof kasta oo:

   **B.**Ku xadgudba (jabiya) heerka deegaanka ee xeerkani dhigayo
   **T**. Ku xadgudba tallaabooyinka xeerkani dhigayo
   **J.** Burburiya, si aan waxtar lahaynna u isticmaala deegaanka iyo khayraadka dabiiciga ah, **waxa uu galay dambi/xadgudub waxaana lagu xukumayaa xadhig u dhexeeya hal sano illaa lix sano ( 1sano – 6sano ) ganaax lacageed oo u dhexeeya hal milyan illaa lix milyan SL.SH ( 1,000,000/=SLsh – 6,000,000/SLsh ).**

**Goddoomiyaha:** Xildhibaanada ogol sidii Golaha Wakiiladu ku ansixiyeen Gacanta ha taagaan:-

Xildhibaanada fadhiya: 45
Xildhibaanada ogol sidii Golaha Wakiiladu u ansixiyey: 19
Xildhibaanada Ogol sidii Golaha Guurtidu u dhigeen: 15

Xidhibaanada Aaamusay: 10

Guddoomiyuhu: Ma Codayn

**Guddoomiyaha:** Qodobka 83^aad waxa loo raacayaa sidii ay Golaha Wakiiladdu ku ansixiyeen.

**Qodobka 84aad**

**Xadgudubyada La Xidhiidha Qashinka Halista ah, Kiimikooyinka iyo Walxaha Shucaaca**

**Qodobka 84^aad Faqradaha 1^aad Xaraf (r) waxay u dhignayd Sidan:-**

**r.** Qariya ama war been ah sheega oo ku saaban maaraynta walxaha khatarta ah, kiimikooyinka iyo walxaha shucaaca.

**Qodobka 84^aad Faqradaha 1^aad Xaraf (r) waxa loo beddelay Sidan:-**

**r.** Qariya ama war been ah sheega oo ku saaban maaraynta walxaha khatarta ah, kiimikooyinka iyo walxaha shucaaca, waxa uu galay dambi/xadgudub waxaana lagu xukumayaa **xadhig u dhexeeya sadex sano illaa toban sano ( 3sano – 10sano ) & ganaax lacageed oo u dhexeeya sadex milyan illaa toban milyan ( 3,000,000/=SLsh – 10,000,000/=SLsh )**.

**Goddoomiyaha:** Xildhibaanada ogol sidii Golaha Wakiiladu ku ansixiyeen Gacanta ha taagaan:-

Xildhibaanada fadhiya: 45
Xildhibaanada ogol sidii Golaha Wakiiladu u ansixiyey: 7
Xildhibaanada Ogol sidii Golaha Guurtidu u dhigeen: 28

Xidhibaanada Aaamusay: 9

Guddoomiyuhu: Ma Codayn

**Guddoomiyaha:** Qodobka 84^aad Xarafka (r) waxa loo raacayaa wax ka beddelka ay sameeyeen Golaha Guurtidu.

**Qodobka 86aad**

**Xadgudubyada La Xidhiidha Amarrada Ilaalinta, Daryeelka iyo Dib u Soo celinta Deegaanka**

**Qodobka 86^aad Faqradaha 1^aad iyo 2^aad waxay u dhignayd Sidan:-**

1. Qof kasta oo:
   **B.**Diida, ka soo bixi waaya ama dayaca amarka Ilaalinta, Fudayndinta ama amarka dib u soo celinta deegaanka
2. Waxa uu galay dambi waxaana lagu xukumayaa xadhig aan ka badnayn laba iyo toban bilood ama ganaax lacageed oo aan ka badnayn shan boqol oo kun SL.SH

**Qodobka 86$^{aad}$ Faqradaha 2$^{aad}$ waxa loo beddelay Sidan:-**

1) Qof kasta oo:
   **B.**Diida, ka soo bixi waaya ama dayaca amarka Ilaalinta, Fudayndinta ama amarka dib u soo celinta deegaanka
2) Waxa uu galay dambi waxaana lagu xukumayaa **xadhig u dhexeeya hal sano illaa sadex sano ( 1sano – 3sano ) & ganaax lacageed oo u dhexeeya hal milyan illaa sadex milyan (1,000,000/=SLsh – 3,000,000/=SLsh)**

**Goddoomiyaha:** Xildhibaanada ogol sidii Golaha Wakiiladu ku ansixiyeen Gacanta ha taagaan:-

Xildhibaanada fadhiya: 45
Xildhibaanada ogol sidii Golaha Wakiiladu u ansixiyey: 1
Xildhibaanada Ogol sidii Golaha Guurtidu u dhigeen: 32

Xidhibaanada Aaamusay: 11

Guddoomiyuhu: Ma Codayn

**Guddoomiyaha:** Qodobka 86$^{aad}$ Faqradaha 2$^{aad}$ waxa loo raacayaa wax ka beddelka ay sameeyeen Golaha Guurtidu.

## Qodobka 87aad
## Ciqaab Guud

**Qodobka 87$^{aad}$ wuxuu u dhignaa Sidan:-**

Qof kasta oo ku xadgudba qodobbada xeerkan ama xeer hoosaadyada ka sii farcama oo aanay jirin ciqaab goonni ah oo xeerkani dhigayo, qofkaas waxaa lagu xukumayaa xadhig aan ka badnayn siddeed iyo toban bilood ama ganaax lacageed saddex boqol iyo konton kun SL.SH ama labada xukun waa la isku raacinayaa.

**Qodobka 87$^{aad}$ waxa loo beddelay Sidan:-**

Qof kasta oo ku xadgudba qodobbada xeerkan ama **xeer-nidaamiyaha** ka sii farcama oo aanay jirin ciqaab goonni ah **ama aanay cuslayn** ciqaabta uu xeerkani dhigayo**, waxaa loo raacayaa ciqaabta xadhig & ganaax ee ku xusan xeerka ciqaabta guud.**

**Goddoomiyaha:** Xildhibaanada ogol sidii Golaha Wakiiladu ku ansixiyeen Gacanta ha taagaan:-

Xildhibaanada fadhiya: 45

Xildhibaanada ogol sidii Golaha Wakiiladu u ansixiyey: 5

Xildhibaanada Ogol sidii Golaha Guurtidu u dhigeen: 27

Xidhibaanada Aaamusay: 12

Guddoomiyuhu: Ma Codayn

**Guddoomiyaha:** Qodobka 87$^{aad}$ waxa loo raacayaa wax ka beddelka ay sameeyeen Golaha Guurtidu.

**Qodobka 90aad**

**Awoodda Soo Saaridda Xeer Nidaamiye (Regulations)**

**Qodobka 90$^{aad}$ wuxuu u dhignaa Sidan:-**

1. Marka ay soo jeediso Wasaaraddu, **Wasaaraddu** iyadoo la tashanaysa wakaaladaha ay khusayso waxa ay samayn kartaa xeer hoosaadyo ku saabsan arrimaha xeerkani ogolyahay in xeer hoosaadyo loo sameeyo si loo dhaqan galiyo qodobbada xeerkan.
2. Xeer hoosaadyada ku xusan faqradda 1aad waxa ay noqon karaan:
   **B**. Qodobbada bixinta ruqsadaha, wax ka badelka iyo la noqoshada ruqsadda.
   **C**. Qodobbada fiiga la qaadayo
   **J**. Si buuxda in loo qabatimo ama qayb xeer hoosaadyada, amarrada

**Qodobka 90$^{aad}$ waxa loo beddelay Sidan:-**

1. Marka ay soo jeediso Wasaaraddu iyadoo la tashanaysa **Hay`adaha Dawladda** ee ay khusayso waxa ay samayn kartaa **xeer-nidaamiye** ku saabsan arrimaha xeerkani ogolyahay in **xeer-nidaamiye** loo sameeyo si loo dhaqan galiyo qodobbada xeerkan.
2. Xeer-nidaamiyaha ku xusan faqradda 1aad waxa ay noqon karaan:
   **B**. Qodobbada bixinta ruqsadaha, wax ka badelka iyo la noqoshada ruqsadda.
   **t**. Qodobbada fiiga la qaadayo
   **J**. Si buuxda in loo qabatimo ama qayb xeer hoosaadyada, amarrada
   **x. Fiiga & cashuuraha laga qaado ruqsadaha qiimayntooda waxaa iska kaashanaya xubno ka tirsan Wasaaradda Maaliyadda, Wasaaradda Deegaanka & Gudida Dhaqaalaha ee G/Wakiilada, waxaana lagu soo saarayaa xeer-nidaamiye.**

**Goddoomiyaha:** Xildhibaanada ogol sidii Golaha Wakiiladu ku ansixiyeen Gacanta ha taagaan:-

Xildhibaanada fadhiya: 45

Xildhibaanada ogol sidii Golaha Wakiiladu u ansixiyey: 4

Xildhibaanada Ogol sidii Golaha Guurtidu u dhigeen: 28

Xidhibaanada Aaamusay: 12

Guddoomiyuhu: Ma Codayn

**Guddoomiyaha:** Qodobka 90aad waxa loo raacayaa wax ka beddelka ay sameeyeen Golaha

| Foomka Codaynta | | | | |
|---|---|---|---|---|
| **No** | **Xildhibaanada Fadhiya** | **Ogol** | **Diidan** | **Aamusay** |
| | **45** | **42** | **0** | **2** |
| | | | | |
| | | | | |

**Guddoomiyuhu:** Ma Codayn

**Cawad Cali Maxamed**
**Agaasimaha waaxda Hadal Qoraalka G/Wakiilada**
**---------------------------------**

**C/risaaq Siciid Ayaanle**
**Xoghayaha Guud ee Golaha wakiilada JSI**
**-----------------------------------**